



HESA FREDRIK

Hoos waxaa ku qeexan macnaha seenyaaleyaasha kala duwan:

VMA, wargelin muhim ah oo dadwaynaha loogu talagalay



Seenyaalaha waxaa la maqlayaa 7 ilbiriqsi kaddib waxaa ku xigta 14 ilbiriqsi oo ammusnaan ah

- Seenyaalaha noocaan ah [VMA] waxaa la isticmaala markii la doonaayo, in hab dhaqsi badan dadwaynaha la wargeliyo halista dhacdoonada qaarkood sida sii-dayn halis ah, dab-kac ama shilal halis ah.
- Haddii seenyaalayaasha noocaas ah aad maqasho:
- Gudaha gal kaddib xir albaabada iyo dariishayadaha.
 - Dhagayso kanaalaha 4:aad ee [Sveriges Radio] ama aqriso farimaha ku qoran bogga 599 [SVT Text], ama warbixin dheeraad ka aqriso bogga internetka krisinformation.se.
 - Ama wac 113 13 (waa lambar laga helo warbixin ku saabsan shilalka iyo dhibaatooyinka kale ee bulshada ka dhacaan).

Digniinka u diyaargarooowga



Seenyaalaha waxaa la maqlayaa 30 ilbiriqsi kaddib waxaa ku xigta 15 ilbiriqsi oo ammusnaan ah

- Halista dagaalka.
- Dhagayso radiyoowga.
- Isku diyaari inaad guriga ka carrarto.
- Hubso halka godadka ammaanka [skyddsrum] ay ku yaallaan.
- Dadyoowga mar hore lagu meeleyay goobaha haddii u dagaal dhaco waa in ay goobahaas qabtaan.

Digniinka weerarka dayuuradaha



Seenyaalayaasha noocan ah waxay ka kooban yihiin seenyaalayaal gaagaaban oo la maqlaayo muddoo hal daqiiqo ah

- Digniinka dayuuradaha wuxuu ka digaa weerarada dayuuradaha iwm
- U carar godadka ammaanka [skyddsrum] ama goob kale oo aad ku samatabixi karto.
- Diyaarso sanduuq kugu jiraan waxyaalaha lagamaarmaanka ah [krislåda].
 - Sanduuqa noocan ah waxaad ku guran karta cunto, busto, nal ama raadiyoow bateri ku shaqaynaayo, shumac iyo tarakh, liiska taleefonada ugu muhimsan, bateeri iyo lacag caddaan ah.

Halis ma jirto



Seenyaalaha waxaa la maqlayaa 30 ilbiriqsi

- Seenyaalaha waxaa la tijaabiyaa maalinta isniinta ee bilaha maarso, juunyo, setembar iyo diseembar ugu horeeyso saacaduna ku beegan tahay 15:00 galinka dambe, waa haddii maalintaas aysan ahayn maalin fasax ah.